

## **\$3 milyan oo Maalgalinta ah Ayaa u Diyaara Mashaariicda Deegaanka iyo Dhaqaalaha ee Degmada South King**

Kooxaha bulshadu hogaamiso ayaa hada codsan kara maalgalinta Dekada Seattle si loo horumariyo deegaanka oo loo kordhiyo fursadaha dhaqaale ee xaafadaha u dhow Gagida Caalamiga ee Diyaaraha Tacoma-Seattle (SEA). Bilaabida wareega saddexaad ee Maalgalinta Saameynta Bulshada Degmada South King, ururadu imika waxay codsan karaan maalgalinta dhowrka sano ah, ilaa \$60,000 ee Deeqaha Deegaanka ama ilaa \$250,000 oo loogu talagalay Soo-kabashada Dhaqaale. Wadar dhan \$500,000 ayaa loo diyaariyey Deeqaha Deegaanka halka ilaa \$2.5 milyan loogu talagalay Soo-kabashada Dhaqaale.

“Deeqaha bulshadu hogaaminayso waxay u keeneen ku dhawaad \$5 milyan Degmada South King. Toos ugu hagaajinta maalgalinta bulshadu waa mid ka mida wadooyinka ugu wanaagsan ee soo-kabashada dhaqaale,” **waxa yidhi Masuulka Dekada Seattle Hamdi Maxamed.** “Xataa waxa kasii muhiimsan, waxaan kordhinaynaa shuraakada saamiga isleeg ee bulshooyinka u dhow Dekada. Shuraakooyinkani waxay ka caawinayaan warshadaha la xidhiidha Dekadu inay helaan ikhtiraac xidhiidh, ikhtiraac, iyo wado goob shaqo. Shuraakadu waxay ka caawisaa Dekada iyo bulshadu inay horumariyaan cadaalada la wadaago iyo ajandaha horumarinta dhaqaalaha loo siman yahay.”

Dekadu waxay asaastay [Maalgalinta Saameynta Bulshada ee Degmada South King](#) sanadka 2019 si loo kordhiyo fursadaha bulshooyinka la dayacay, isir ahaan iyo dhaqaale ahaan kala duwan. SKCCIF waa hal qaab oo Dekadu uga shaqeyso hiigsigeeda soo-kabasho siman, deegaanka wanaagsan, iyo nolol tayo wacan leh. Maalgalinta waxay ku deeqi doontaa \$10 milyan inta dhaxaysa 2019 iyo 2024. In kabadan 54 mashruuc ayey heshay SKCCIF maalgalin ilaa 2019, oo caawinaysa mashaariicda bulshadu hogaamiso inay midho dhalaan. In badan oo ka mida mashaariicdani waxay kordhiyaan caawimada codsiga shaqo ee bulshooyinka la dayacay iyo kuwa aan ku hadal Ingiriisiga, waxay u carbiyan barnaamijyada carbiska shaqo iyo xirfadaha bada, dhisida beeraha, nadiifiyaan goobaha dadweynaha, oo kordhiyaan waxbarashada deegaanka.

“World Relief Western Washington adeegyada qaxoontiga, magan-galyo doonka, iyo muhaajiriinta (oo ay ku jiraan dadka loosii daayey arimo binaadanimo laganasoo daad gureeyey Afghanistan iyo Ukraine) – bulshooyinka ay aadka u saameysay mushkilada dhaqaale ee uu sababay COVID-19,” **waxa yidhi Medard Ngueta, Agaasimaha Guud, World Relief Western Washington.** “Maalgalinta Saameynta Bulshooyinka ee Degmada South King waxay inoo suurto galinaysaa inaan ku xidhno bulshadan fursadsaha shaqooyinka shaqaaleysiiyayaasha Dekada Seattle kuwaasoo siiya in ku filan iyaga oo aanay kaliya ku badbaadayn dhaqaale ahaan, balse ku horumarinayaan bulshooyinkooda. Tani, badelkeeda, waxay kor u qaadaysaa dhaqaalaha maxaliga.”

“Barnaamijka deeqdu wuxuu siinayaa ururada sida keena cod mustaqbalka bulshadeena ah,” waxa yidhi Ayaanle Ismaaciil, Agaasimaha Guud ee Farqiga Dhaqanka Bridging. “Waxaanu beeraynaa dhir badan oo waarta, lakiin shuraakadani waxay sidoo kale inoo saamaxaysaa inaan balaadhino hawlaha bulsho iyo dhaqan ee faa’idada jilaalka mustaqbalka.”

### **Nidaamka Codsiga**

- Miyaad haysaa mashruuc leh natiijooyin la xidhiidha horumarinta goobta shaqada, shaqo abuurka, ama soo-kabashada dhaqaale ee warshadaha la xidhiidha Dekada? Codso Barnaamijka Soo-kabashada Dhaqaale. [Learn more>](#)

- Miyaad haysaa mashruuc kordhinaaya helitaanka meelaha cagaaran oo horumarinaaya nolosha bulshooyinka Burien, Des Moines, Federal Way, Normandy Park, SeaTac, iyo Tukwila. Codso Barnaamijka Deeqda Deegaanka. [Learn more>](#)

Ururadu waxay codsan karaan labadaba hal ama dhowr sano maalgalin ah. Mashruucna aad uma yara. Shaqaalaha Dekada ayaa martigalin doona kulamo macluud, aad oo siin doona caawimo farsamo si loo caawiyo codsadyaasha iyadoo la maraayo nidaamka codsiga.

- Codso \$100,000 hal sano kaliya maalgalinta iyo ilaa \$250,000 maalgalinta sanado badan oo loogu talagalay mashaariicda soo-kabashada dhaqaale.
- Codso \$20,000 hal sano kaliya maalgalinta iyo ilaa \$60,000 maalgalinta sanado badan oo loogu talagalay mashaariicda deegaanka

### **Ku Sahabsan Barnaamijka Soo-Kabashada Dhaqaale**

Xiriirka lala leeyahay dhammaan qaybaha dhaqaalaha ee muhiimka ah ee Washington iyo isku xirka in ka badan 500 loo-shaqeeyayaasha ee ka hawlgala xarumayaasheena, Dekeddu waxay ku taal meel gaar ah si ay u hogaamiso soo kabasho gobolka.

Barnaamijka Soo-kabashada dhaqaale wuxuu ku xidhayaa fursadaha dhaqaale bulshooyinka ugu baahida badan madaamoo aanu tababarayno jiilka shaqaalaha warshadaha la xidhiidha Dekada. Dekeddu waxay qandaraas siisaa hay'adaha u adeegaya bulshooyinka sida aadka ah u saameeyay dhaqaale xumada hadda jirta ee mashaariicda ku xiran warshadaha Dekadda, oo ay ku jiraan duulista, badda, ganacsiga dhismaha, iyo warshadaha mihnadaha cagaaran.

Mashaariicda bulshadu hogaamiso waxay ka caawinayaan ka qeybqaatayaashu inay helaan xirfadaha, khibrada, iyo waxbarashada ay ugu baahan yihiin inay ku kordhiyaan mushaharka shaqooyinka iyo goyska ee balaadhan ee Dekada iyo warshadaha la xidhiidha.

[Waxbadan ka ogow 12 urur ee Degmada South King helaaya maalgalinta wareega 2>](#)

### **Codso Go'aaminta Kuhaboonaanshaha Oktoobar 20, 2022.**

[Raadi macluumaad dheeriya oo khuseeya nidaamka codsiga, agabka codsiga, iyo mashaariicda hore loogu deeqay>](#)

### **Ku Sahabsan Deeqaha Deegaanka**

Iyadoo la maraayo maalgalinta iyo shuraakada ururada bulshada ku saleysan, Barnaamijka Deeqaha Deegaanku wuxuu keenayaa maalgalinta mashaariicda Dekada ee magaaloyinka ku xeeran gagida diyaaradaha si kor loogu qaado nolosha, loo horumariyo meelaha cagaaran, oo loosoo celiyo kaymaha.

Iyadoo ay wada saameeyeen caafimaadka iyo dhaqaale ee COVID-19 bulshooyinka dakhliga hooseeya iyo kuwa midabka, baahida maalgalinaha Degmada South King imikay ugu badan tahay, madaamoo

dadka degan ee bulshadani aanay aad u helin beeraha dadweynaha iyo goobaha cagaaran ee inta kale ee Degmada.

Bulshooyinka Degmada South King waxay waajahaan saameyn deegaan oo aan loo sineyn oo ay ugu wacan tahay taariikhda fog ee dhaqamada isticmaalka dhulka aan is leekayn iyo baro-bixinta dhaqaale ee u riixday bulshooyinka jilicdasan koonfurta.

Barnaamijka Deeqaha Deegaanku wuxuu casriyeeyeye shaqada dekada ee bulshooyinku si loo horumariyo helitaanka fursadaha maalgalined. Ilaa 2020, Dekadu waxay si dhow ula shaqeysay koox xidhiidh dhaqamada iyo luuqadaha ah si loo aqoonsado loogana saaro meesaha caqabadaha ka qeybgalka iyadoo la abuuraayo agabka deeqaha iyo tababar xidhiidh si loo fuliyo wacyigalinta si kor loogu qaado fursadaha deeqaha, loo horumariyo helitaanka bulshada ee fursadaha maalgalined.

**Gudbi Codigaaga Deeqaha Deegaanka Oktoobar 28, 2022.**

[Hel liiska mashaariicda horey loo baxshay, faahfaahin dheeriya, agabka codsiga, oo waxbadan ka ogow sida loo codsado>](#)